


GAYAANKII DHICIREED

(SHEEKO DHAQAMEED GAABAN)

Maxamed B. Siciid

22/luulyo/2017

GAYAANKII DHICIREED

(SHEEKO DHAQAMEED GAABAN)

Maxamed B. Siciid
22/luulyo /2017

xuquuqda qoraalku waxay u sugantahay © qoraha Maxamed B. Siciid

lama badin karo waxbana lagama badali karo ogolaansho la’ aan

“sheekadani cid gaar ah ma khusayso ase waa mid aan muujinayo dhaqankii hore ee guurdoonka Soomaaliyeed, deegaanka dhicir wuxuu yaal Gobolka Nugaal”

Maxamed B. Siciid

GAYAANKII DHICIREED

xilligu waa gugii sanadka bishuna waa *cawl*, waxaa eegga laga soo gudbay waa *seermo waydo*, tan foodda iminka inagu soo haysana waa *dirir sagaalaad*, gooobtuna wa baaxasooraha degsiimada dhicir, deegaan caraf badan, jawi macaan iyo qabow ku can ah leh, waa degsiimo ku taala dhul barwaaqo sooran ah oo leh baadkii meesiyada xoolaha. cirku waa curtay ase haddana waa cusub yahay waxaa ka muuqda saylaamadii hogosha waxaa laga dhursugayaa

inuu markale soo hooro maadaama wali lagu guda jiro xilligii guga, da'yartuna waxay qaadayaan……

Roobow riglow kaalay
Riyo dararíyow kaalay
Ceesaamo gayr gayran
Oo gabi kasoo jeeda…

dhulku waa carfoon dhirtu ubax ayay bixisay, waxaa wada muuqda xaareed waran dhulka, ceelashuna waa buuxaan waxaa laga dhaansadaa xareed ligic ah oo aan lahayn dhoobo iyo lulug, xooluhu waa dhaleen kadimadii maandeeq waxaa laga gaax lisaa gaawayaal caano ah, gorofku waa hal mar, godolkeedana looguma laabto, waxaa loo dhaafaa waa dharqashada maqasheeda.

muddo yar kadib degsiimadii ayaa noqotay mid ay ka muuqato suugaan sahamiyaasha indhahooda wada qabatay, sahamiya walba eesoo dhugtana wuxuu go'aansaday inuu awrka rarka soo saaro adhigana xerada kasoo didiyo, maalingaal iyo minqaadba waa loosoo socdaalay, barqo guur iyo carraabaysiba waa lagu soo guuray, Nimba taagtii waxaa loosoo degey si tarab tarab ah.

muddo yar kadibna degsiimadii waxay noqotay mid ku cammiran bulsho fara badan oo ah dhammaan reer guuragii deegaanka dhicir, inta ku xeeran iyo kuwo ka fogba sida isakoro, xeradaa muudal IWM.

dadyowgii faraha badnaa ee soo dagay deegaanka waxaa kamid ahaa labo qoys oo ay u kala kacaameen inan(*Dhaddig*) iyo inan(*Lab*) ku barbaaray noloshiii miyiga soomaalidii hore. waa reer **Siyaad** oo ah aabaha dhalay **Hillaac** iyo reer **wayra**x oo ah aabaha dhalay **Hibo**.

Labada reer waa labo reer oo kamid ah soomaalidii hore ee ku noolayd miyaga.

Hillaac ayaa ahaa wiil reerkiisa u ciidamiya, kol walbana ayuu ahaa mid reerka u qaban jiray hawlaha ragga ee looga baahan yahay ninka reerka u wayn inuu qabto.

Waxaa lagu ammaani jiray dhego nugayl, hawl karnimo, baarrinimo, geeesinimo iyo aftahanimo.

Hibo ayaa ahayd gabar xilkas dumar ah, aabeheed aya ahaa mid jeclaysta shaqada ay gacanta u qaaddo, nadaafad iyo hufnaan ayaa kamuuqata goor walba, quruxda waxay ka ahayd quraysh, nafteeda waxay u dhowri jirtay si joogto.

Goor ay tahay galab, aabbe siyaad oo isu diyaarinaya inuu dheelmo geela, ayaa tabay hashii wiilkiisa hillac yaraantiisii caanaha looga maali jiray ee ahayd ***SUUB*** ee u ahayd hoooyadiisa labaad, wuxuu wiilkiisa u diray inuu baadi goobo hasha maadaama uu arliga joogo dhurwaa xiiraa ah, dayaxa naylaqaadna soo weerer taga. Hillaac oo ahaa baarri haddiiba

balow ayuu yiri si uu u raadiyo hashii suub ahayd.

Wuxuu sii socdaba isagoo dhexda sii maraya goor casar liiq, ah qorraxduna baalka sii galinayso godkeeda, ayuu arkay inan***(dhaddig)*** ari mayracaysa, usoo dhaqaaq dhankii ay ka jirtay gabadhu, wuxuu soo socdaba markuu ag yimid ayuu yiri:-

Hillaac*: waa lagu salaamay?*

Hibo*: lagaa qaad!*

Hillac*: xoolo baadi ah ma aragtay?*

Hibo*: waa meesigee?*

Hillaac*: waa tulud sumad leh.*

“xaglo geel wax gunti la galiyo ka wayne, kooddaas cagaftu marto geel ayaa daaqaya” ayay tiri.!!!

Hillaac waxa uu ka helay quruxda gabadha

Ka muuqata, joogga, luqunta, labiska, maadaama uuna ahaa guurdoon iyadana u arkay kufkiisa waxuu isku dayay inuu waydiiyo su’aalo maskax maamis ah si uu u miisaamo garaadkeeda.

Dhaqan ayay ka ahayd bulshayinkii hore ee baadiyaha in dhaqanka guurdoonka lamaanaha uu gaclooday uu baadhitaamo ku sameeyo garaadka iyo geesi nimda uu qabo.

Suaalahii uu waydiiyayna waxay ahaayeen sida tan…..

Hillac:-*inanyahay waxaad sheegtaa*

(wax, xagga bari jira, xagg boqox jira, berri carrab jira, banbannaan jira, afku gooyoo asayn biri goyn)?

Hibo:-*inanyohow xilo weeyoo waannu garanaye "**Meherka weeyeena**", adna waxaag garataa **(laba aan labo yarayn)?***

Hillaac:-*waa tan koodaawe Hal fiican ninkii leh macaano yara, waa tan labaade Naag fiican ninkii lihi ma sed yara.*

Hillaac waxaa usoo baxday garaadka wanaagsan ee gabadha, Hibona ogaatay Ragay inuu yahay, Hiilaac wuxuu si waydiyey madaxbannaanideeda, Hibona u sheegtay inay inantahay.

Is afgarte, waxayna ku hashiiyeen hadalna ku xanaftireen inay guur wada sameeyaan inantuna ay diyaar u tahay inuu u soo geedfariisto, biyaha guga cusub waa la dawo dhigtay.

Hillaac go'aankii gowska damme ayuu ku qabsaday, hashiisii baadi goobkeediina waa kusii dhaqaaqay, wuxuu sii rucleeyaba, Humaagsi iyo bidhidhicawsi ayuu ku gaaray kobtii inantu u tilmaamtay, wuuna helay hashiisii suub ahayd.

wuxuu usoo dhaqaajiyey halkii reerku yaallay, isga oo ugu heesaya,

waa horwaynii
markuu hawd galo
waraabe hurdiyo
hadda kicin jiray

soo gaaryay reerkiisii, ase ninku ninkii hasha kaliya doonay maahe gabarna waasoo helay, balow balow ayaa habeenkaas looga yaabay, shaqo badni iyo kasbasho, illeen waa nin arrimo kale ka guuxayaane waxaanba dhib uma arkee.

waxay saas ku joogaanba soo dhowaatay ammintii ballanta, Hilaac aabbe siyaad ka dhaadhici arrinkii.

Aabbe Siyaad iyo garmadow kale is diyaariye, waxaa loosoo socdaalay reerkii inantii Hibo ahayd. oday wayrax waa diyaar, gabadhiisa ayaa ballanta ogaysiisay, soo dhowee reer siyaad iyo gar madowdii kale, inankii waa garab socdaa Hillaac aha.

is waraysi iyo sooryayntii kaddib waxaa la gudo galay xaajadii loo socday.

llko Rummay ayaa lagu caddeeyaa afna waa hadale, Nabadoon warsame warkiisii ayuu qaaday isagoo ku hadlaya afka martida, Diirkana Kaqaad xaajadii ay u socdeen .

Waa dhagan iyo diin in gabadha xoolo laga bixiyo

Oday wayrax xujoooyinkiisii guurdoonka u ku xiray waxay kala ahaayeen in gabadha uu ku bixinayo yarad dhan 100(boqol) neef oo Geel ah, 5(shan) Fardood iyo qori maadhiin ah, gabadhuna waa xilahiinna markaas.

La isku afgaray reer siyaadna waxay sii baxsheen gabbaati, ase waxaa lagu baarrintamay hawraarsan iyo biyaha guga damme, oo lagu qabto kulan isla goobtan.

hibo maanta waa doonno *(inanta nin u doonnan)*,

waa laga xishoodaa sida qof laqabo, golayaasha dhaantada lagu ciyaaro marka lagu kulmo waa laga gaabsadaa,

“waa inantii loosoo geed fariistaye hallaga xishoodo”.

oday wayrax maanta waa nastay, maadaama welwelka ugu wayn ee aabayaasha uu yahay inantiisa guurkeeda, soomaaliduna waxay ku tiraahdaa (*inani god ama guri hakaaga jirto*).

Waxaa dhammaatay mudadii loo qabtay guurdoonka iyo garmadowdii,

reer siyaadna waa diyaar, 100(boqol) neef oo dhogor geel ah ayay duleedka aqalka soo tubeen, 2(labo) geenyo oo Baroor ah, 3(saddex)sange oo qaaje iyo xamar ah, qorigiina golahaa laga dhiibay.

waa heer gobeede wa la isku afgartay bixinta Hibo, iyo gacan ka siinta Hillaac. muddo todobaad ah kaddib ayaa laguri galiyey Hibo. waxaana lagu galbiyay 3(saddex) rati, Hal irmaan oo dhibbaad ah, iyo 25(labaatan iyo shan) halaad oo yarad sooran ah. Aqal daryaale ah ayaa loo taagay 30 neef oo Adhi ahna waa loo

xereeyay, waxay baal ka degaaanka Dhicir, sidaas ayayna isku calfadeen caruurna ku dhaleen.

Dhammaad



Maxamed Bashiir Saciid

Mbashirsaid98@gmail.com

Garoowe, Nugaal, Somaaliya

22/luulyo/2017